

# Inaga Caawi Inaan Diirada Saarno Waxa Muhiimada Ugu Weyn Leh

## WAXAAN RABNAA INAAN ADIGA KAA MAQALNO

Baari'aannada badankood, waxaan ku weydiin doonnaa inaad buuxiso dhowr foomam oo baaris ah kahor intaadan u tagin dhakhtarka ama kalkaaliyahaga caafimaad. Su'aalaha foomamkan ku jira ayaa is beddelaya iyadoo lagu saleynayo da'da ilmahaaga.

**Foomamku waxay ku weydiin karaan su'aalo ku saabsan:**



**Kobaca ilmahaagu –**

*Sida ay wax u baranayaan, u korayaan, una wada xiriirinayaan*



**Sida aad caafimaad ahaan tahay iyo sida aad dareemayso**



**Noolasha guriga**

Waxaa laga yaabaa inaad layaabto sababta aan su'aalahan kuu weydiinayo. Waay fududahay - waxaan dooneynaa inaan sida ugu fiican uga faa'iideysano waqtiga aan la qaadanayno qoyskaaga, jawaabahaaguna ayaa ka caawin doona dhakhtarka inuu diirada saaro su'aalahaaga iyo walaacyadaada leh muhiimada ugu weyn.



## WAXAA TAHAY KHABIIRKA

In kasta oo aanu nahay khubaro ku takhasustay caafimaadka carruurta, hadana adiga ayaa khabiir ku ah ilmahaagu. Waxaan ku weydiineynaa su'aalahan maxaa yeelay waxaa jira waxyaabo badan oo ka baxsan xafiiska dhakhtarka oo saameeya caafimaadka ilmahaagu. Waxaan u baahan nahay kaalmadaada si aan u fahamno sida ilmahaagu u korayo, isku beddelayo, iyo sida uu ula macaamilayo dunida - waxyaabo aan had iyo jeer arki karin ama aanan cabbiri karin inta lagu gudajira baari'aanka.

## WAXAAN HALKAN U JOOGNAA INAAN KU CAAWINO!

Jawaabaha aad ku bixiso foomamku ayaa waxay dhakhtarkaaga siinayaan tilmaamo muhiim ah oo ku saabsan waxa si fiican u socda, iyo halka laga yaabo inaad ugu baahan tahay taageero dheeri ah. Haddii adiga iyo dhakhtarkaaga aad ogaataan in uu jira wax aanan gaarsiisnayn heerka fiicnaanta ee la gaari karo, waxaan wadaagi karnaa aalado iyo dhigaalo si aan u xaqiijino in adiga iyo ilmahaagu aad heshaan daryeelka iyo taageerada aad u baahan tihiin.



**Waad ku mahadsan tahay buuxinta foomamka, iyo sida aad inooga caawisay inaan ilmahaagu siino daryeelka suurtagal ahaan ugu fiican.**

Agabyada dib loo isticmaalay iyadoo ogolaansho laga haysto Akadeemiyada Mareykanka ee Caafimaadka Carruurta ("AAP") ayaa waxay markii hore ku soo baxeen Ingiriis, waxaana daabacday AAP. AAP mas'uul kama aha wixii khaladaad ka dhasho tarjumaadda luqada Ingiriisiga ee ay agabyadu ku qornaayeen, oo ay ku jiraan khalad kasta ama khalad ka dhashay tarjumaadda Ingiriisiga.

